

## بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

### ASAASAYAASHII URURKA MIDNIMADDA DHALINYARADDA SOOMAALIYEED ( S Y L )



- |                             |                                   |                           |
|-----------------------------|-----------------------------------|---------------------------|
| 1- Yaasiin Xaaji Cismaan.   | 2- Cabdulqaadir Sh. sakhaawadiin. | 3- Xaaji Maxamed Xuseen.  |
| 4- Cismaan Geedi Raage.     | 5- Khaliif Huudow Macallin.       | 6- Maxamed Cimaan Baarbe. |
| 7- Max'ed Cabdalla Xayeesi. | 8- Maxamed Cali Nuur.             | 9- Dheere Xaaji Dheere.   |
| 10- Sayidiin Xirsi Nuur.    | 11- Maxamed Faarax Hilowle.       | 12- Daahir Xaaji Cismaan. |
| 13- Cali Xassan Maxamed.    |                                   |                           |

### MARKII UGU HOREYSAY MAGACYADII GUDDIGII MIDEYNTA SOOMAALIYA

Moh'ed Ibrahim Egal

Aden Abdulle Osman

Hagi Bashir Ismail

A/kadir Moh'ed Aden



Muse Rabile God

Ali Garad Jama

A/Ilahi Isse Moh'ud

Moh'ud Moh'ed Farah

- |                                   |                                  |                                    |
|-----------------------------------|----------------------------------|------------------------------------|
| Mudane Aaden Cabdulle Cusmaan.    | Mudane Xaaji Bashiir Ismaaciil.  | MD. Maxamed X. Ibraahim Cigaal.    |
| MD. C/qaadir Max'ed Aaden (Zope). | Mudane Cali Garaad Jaamac.       | Mudane Maxamed Cali Faarax.        |
| Mudane Cabdullaahi Ciise Max'ud.  | MD. Axmed Xaaji Ducaale (Keyse). | MD. Max'ud Max'ed Faarax (M/guur). |
| Mudane Xaaji Yuusuf Iimaan.       | MD. Max'ud Cabdi Nuur (Juuje).   | Mudane Avv. Max'ed Shiikh Gabyow.  |
| MD. Max'ud Yuusuf Aaden (Muro).   | MD. Cabdullaahi Max'ed Qablan    | Mudane Xaaji Ibraahim Nuur.        |
| Mudane Xaaji Cabdullaahi Mursal.  | Mudane Muuse Rabiile Good.       | Mudane Sh. Max'ed Isxaaq Salaad    |

## **HORDHAC 15 / 11 / 11 :- CIID MUBAARAK.**

- Waxaan walaalaha Soomaaliyeed & Islaamka guud ahaanba u dirayaa hambalyada ciida Arafo, Illaahay waxaan nooga baryey nabadgelyo, barwaaqo, horumar, iyo midnimo. **Aamiin.**



- Qodobka labaad waxaan ka cudur daaranayaa in bil iyo dheeraad (40 maalmood) aan qaybta Afaraad dib ula dhacay, waan mashquulay, laakiin dib ayaan ka soo kabayaa insha allaah.
- Qodobka Saddexaad aan ku eegno dhacdo aan filayo inaad la socotaan oo fiiro gaara mudan, arrinta **Falastiin** oo muddo hor taal golaha amaanka **QM**, cod ayaa loo qaadi lahaa usbuucaan. In kastoo ay ku dadaaleen inay aqlabiyad sagaal **(9) cod** helaan, waxa sugayey diidmada qayaxan ee loo yaqaan **“VETO”** oo ay ku hanjabtay dowlad ka mid ah xubnaha joogtada Golaha Amaanka. Maamulka Falastiin waxuu ku soo jiray wada hadal heshiis mudo ku dhow **labaatan (20) sanadood**, ayadoo afka looga qirsanaa in ay noqonayaan Dowladd daris la ah Israel, iyo xuduudii **1967kii**. waxay maanta joogtaa meeshii ay ka bilaabatay, waxaana muranka ugu wayni yahay Caasimadda xuduudka, qaxootiga iyo midda ugu daran **dhismayaasha Cusub & taariikhda xoriyadda Falastiin**. Dadaalka Falastiin ee maanta waxaa iiga muuqday walwalkii iyo baqdintii Xisbiga **SYL** iyo xisbiyadii wadaniga ahaa ka qabeen in dowlad weyni arrintooda keliyeysato, sidaas darteed ayey dalbadeen afarta quwadood oo **QM** ilaalineyso iyo **taariikhda xoriyada oo la cayimo**, waxaa horta muhiim ah ansixinta taariikhda xoriyadda **toban (10) maalmood & toban (10) sano** kii ay doono ha ahaatee. Qiyaasa farqiga **Aqoon, Ilbaxnimo, & Dhaqaale** madaxdii **SYL & SNL 1948**, iyo madaxda **PLO 2011**.

**M a h a d s a n i d i i n**

**Abdullahi Hagi Bashir Ismail ( [ahbismail@yahoo.com](mailto:ahbismail@yahoo.com) )**

**Rugta Baarista Taariikhda**

**Soomaaliya iyo Geeska Afrika**



## QAYBTII AFARAAD IV :-

20/1/1948kii waxaa qabsoomay dhoolatuskii taageerayaasha Xisbiga SYL, waxuuna Wafdigi QM yaqiinsaday baaxadda xisbiga ugu balaaran dalka, waxuuna shir la galay guddigii Xisbiga SYL.

Guddigii Xisbiga SYL waxuu u gudbiyey wafdiga QM aragtida xisbiga ee aayo ka-talinta Soomaaliya.

Waxaa kaloo wafdigu qaabilay xisbiyadii iyo qaybaha bulshadda, waxaana kulamadaasi u dhaceen :-



Xaaji Max'ed Xuseen



C/Ilaahi Ciise Max'ud



Xaaji Bashiir Ismaaciil



Xaaji Faarax Cali

- Sawiro : Afar (4) ka mid ah Lixdii (6) xubnood ee guddiga xisbiga SYL u magacaabay qaabilaadda wafdiga QM.

## = Guddigii Xisbiga (SYL):

Qaabilaadii wafdiga QM ayaa guddigii SYL ku eedeeyeen Talyaaniga dagaalkii Xamar ka dhacday,

waxayna u gudbiyeen qoraalkii aragtida Xisbiga SYL ee gobanimo iyo midnimo-doonka Soomaalida :-

- In xisbigu ka soo horjeedo talada Soomaaliya oo mar kale gacanta loo geliya Dowladda Talyaaniga.
  - Inay diyaar u yihiin **Toban (10) Sanadood** oo loo diyaariyo maamul iyo dowladnimo, ayna gacanta ku hayaan afarta Dowladood (**four powers**), iyo Qaramada Midoobay oo dusha ka ilaalisa.
  - In mudadaas Soomaalidu kula wareegaan maamulkooda, diyaarsadaana shuruuc iyo dastuur kmg.
  - In midnimadda Soomaaliyeed muqadas tahay, lagana cayimo **QM** taariikhda Gobanimadda Dalka.
  - In la tirtiro qawaaniinta kasoo horjeeda Diinta Islaamka, sharciyada xayiraada socodka, xoriyadaha sida xoog ku shaqaynta, kala sooca midabka iyo ciqaabta ra'yiga ee xukunka gumeystaha iwm.
- Waxaana qoraalkaas asagoo wakiil ka ah **Guddigii Xisbiga SYL** wafdiga **QM** hortiisa ka akhriyey :-  
**Xoghaye Guud ee Xisbiga SYL, Afhayeenka guddiga = Mudane Cabdullaahi Ciise Maxamuud.**

“ Soomaaliyeey toosoo, Toosoo isku tiirsada ee = Hadba kiina tag daranee, Taageera Waligiinee  
Tuldo geeloo dhacan baad, Toogashu bareedhaane= Dhulkaas dhane tagay baan, nina dhagax u tuureyne  
Sharcigaa isku kiin tolayo, Luuqadaa tuwaaxid aho = Arligiinaa taako aho, Kuma Kala tegeysaan ee  
Hadba waxan la ooyaayo, Ilmadu iiga Qubaneyso = Ikhtiyaar nin loo diidoo, La adoonsadaan ahayee “

( Cali Mire Cawaale & Yuusuf Xaaji Aaden ).

- Sawirka : Masjidka jaamaca Magaaladda Baydhaba Janaay.



### = Guddigii Xisbiga Digil & mirifle

#### Dastuur & Midnimo (DM):-

**Guddiga Xisbiga DM** markay soo dhameysteen dhoolatuskoodii oo ay dad badani kala qayb galeen, waxay wafdiga **QM** la qaateen shir gaar ah, waxayna u gudbiyeen qoraal ay ku cadahay aragtidooda.

Waxaanna ku soo koobaynaa :-

- Inay u doonayaan madax-bannaani goboladda Soomaaliyeed oo dhan.
- Inay doonayaan midnimo Soomaaliyeed oo goboladda oo dhan ah.
- Inaysan doonayn in Dowladda Talyaaniga dib loogu soo celiyo Soomaaliya.
- In toban **(10)** sano loogu diyaariyo maamul iyo shuruuc, xoriyadna ay gaarsiiso **QM**.

waxay cadeeyeen inay taageersan yihiin dhamaan aragtida **SYL**, waxaana guddigooda horkacayey :-

**Mudane Cabdinuur Maxamed Xuseen. & Mudane Xaaji Cabdullaahi Mursal.**

### = Guddigii Naadiga Dhalinyaradda Xamar (HYC): -

**Guddiga Naadiga HYC** waxay wafdiga **QM** u soo bandhigeen dhoolatuska taageerayaasha naadiga, waxay galeen shir ay ku faahfaahiyeen kaalintooda halganka, taariikhda Soomaali-nimo ee xisbiga, ayagoo ku abtirsaday laga bilaabo goobta shirka ilaa deegaano & degmooyin Xamar ka baxsan.

Dhanka aragtidooda gobanimadda & midnimadda Ummadda Soomaaliyeed oo ku saleysan raadinta Soomaali Weyn, waxay wafdiga **QM** u gudbiyeen qoraal ay ku cadeeyeen inay talada la wadaagaan dhamaan aragtidii xisbiyadda **SYL & DM**, guddiga Naadiga **HYC** oo ka koobnaa **Lix (6)** xubnood :-

Afhayeenka Guddiga **HYC** : = **Mudane Maxamed Abuukar Abooke**

Xubno : = **Mudane Xaaji Muxyadiin Xaaji Cali.** = **Mudane Shiikh Cumar Xaaji Yusur.**

Sawirka : Magaaladda Marka Caddeey  
Minan aw Cismaan  
oo dhusha laga sawiray



## = Guddigii Xisbiga Kulanka

### Soomaaliyeed :-

**Guddiga Kulanka** oo ka kooban ururo midoobay waxay wafdiga **QM** u gudbiyeen qoraal ka duwan fikradihii iyo dalabyadii xisbiyadda kale, waxayna aragtidooda ku soo ururiyeen :

- In Soomaaliya ( **Koonfurta** ) si ku meel gaar ah loogu celiyo gacanta Dowladda Talyaaniga, ayna sabab uga dhigeen aqoonta afka, dhaqanka iyo xiriirka ganacsiga u bilowday labada dhinac.
- In mudada gaarsiinta xoriyaddu aysan ka yaraan **Soddon (30) sanadood**, ayagoo taasna qiil uga dhigay in Soomaalidu markaas iyo wakhti ku dhowba aysan u bislayn hanasho Dowladnimo.
- In mudadaas Soomaalida loogu diyaariyo kaadir iyo shuruuc, ayna Talyaani dusha ka ilaaliso **QM**. Qodabadda qoraalka oo gaarayey Saddex iyo Toban (**13**), waxaa guddiga hadalka u jeedinayey :- Afhayeenka Guddiga Kulanka = **Mudane Islow Mahadalle Maxamed**.

### = Guddiga Rugta Ganacsiga Soomaaliyeed :-

Waxaa rugta ganacsiga la asaasay **1947kii**, hal sano ka hor imaanshaha & qaabilaadda wafdiga **QM**.

Waxaana xubnihiisu ka kooban yihiin sidatan :-

= **Talyaani**...120 xubnood. = **Hindi**...45 xubnood. = **Soomaali**...22 xubnood. = **Carab**...18 xubnood.  
= **Ingriis** .... 2 xubin. = **Pakistaan** ...2 xubin. = **Eritareya** ...1 xubin. = **Dhamaan**..210 xubn.

Guddigii rugta ganacsiga ayaa la kulmay wafdigii **QM**, hadalkoodii ayaa sidatan u qaybsamay :-

- Codkii Talyaanigu waxuu dalbaday in Soomaaliya loo dhiibo Talyaaniga muddo aan xadidneyn.
- Codkii Soomaaliduna waxuu codsaday inaan Talyaani lagu soo celin Soomaaliya, ayagoo qoraal ahaan ugu gudbiyey wafdiga **QM** dhibaatadii nidaamkii faashiga ahaa ka geystay Soomaaliya.
- Jinsiyadaha laga badan yahay **Carab, Hindi, Pakistaan iwm**, waxay dalbeen **Aqaliyad Ajnabi** ah, la ilaaliyo xuquuqdooda, lana damaanad qaado inay sii wataan shaqadooda iyo ganacsigooda.

- Sawirka : Bartamaha Magaaladda Berbera



## = Qaabilaad & Dhoolatus

### Wufuudii Goboladda

#### Soomaaliyeed : -

“Ubadkiinii waad daadiseen, waana dubateene – Dubaaxdiisi waad wada cunteen, duhur dharaareede. Dariiq toosan Soomaaliyeey, waa lagaa dadaye – Darajadda Illaahay ninkii , doonayaa helaa e. Nin ka duday distoorkiyo waxyiga, diintii ka carooye–Dugsi maleh qabyaaladi waxay, dumiso mooyaane”  
**Cabdullaahi Suldaan Maxamed ( Timo-cadde ).**

Waxaa lagu qabtay Xamar dhoolatus wadajir ah oo dadku ay matalayeen **Shanta Soomaaliyeed**.

ayagoo gacmaha is heysta, korna ugu dhawaaqaya **Xornimo iyo Midnimo = Soomaali weyn**.

Wufuudii ka socotay shacabka iyo xisbiyada goboladda Soomaaliyeed ee gumeysiga ku jiray :

- Wafdigii ka socday Waqooyiga Soomaaliya ee uu hogaaminayey Xisbiga **SNL**.
- Wafdigii ka socday Galbeedka Soomaaliya ( **Ogaadeenya, Hawd, iyo dhulka xayndaaban** ).
- Wafdigii ka socday dhulka Koonfurta Soomaaliya ee loo yaqaan **NFD**.
- Wafdigii ka socday dadka iyo dalka Soomaaliyeed ee Xeebta **Jibuuti**.

Wufuudaas oo ay garab socdaan dadweynihii Xamar iyo Ururadii wadaniga ahaa uu ugu horeeyo


Xisbiga **SYL** ayaa hortagay madashii shirarka, wufuudii goboladda ayaa la galay shir Wafdiga **QM**.

Isku soo duub oo waxay warbixintoodu ahayd Cabasho iyo Dalab :-

- In dhibaato nooc walba leh gumeystaha kala duwani kula kaco dhamaan qaybaha bulshadda Soomaaliyeed, wax xuquuq ahna aysan ku haysan dhulkooda, aysana u sii dulqaadan doonin.
- Inay taageersan yihiin dalabka xoriyadda ee walaalahood (**koonfurta**), ayaguna dalbanayaan xoriyad iyo in **QM** fuliso waajibkeeda, kana dul qaado dulmiga lagu hayo shucuubta caalamka.
- Waxaan codsaneynaa in la caddeeyo xoriyadda shacabka & dhulka Soomaaliyeed shuruudeeda, iyo taariikhda xoriyadda iyo midnimada oo laga cayimo **Qaramadda Midoobay**.
- In meel la isugu geeyo qadiyadda dadka Soomaaliyeed, la horjoogsado quwadaha qaybsanaya, aayahooduna noqdo **Dowlad Soomaaliyeed** oo xor ah, oo mid ah ( **Soomaali Weyn** ).
- Ugu dambeys waxay beesha caalamka uga digeen dhibaato weyn oo saameysa geeska Afrika.

## = Qaablaadii Ururadda

### Bulshadda :-



Cabdullaahi Suldaan (Timo-Cadde) Qaasim Hilowle (Iskiifo) Cismaan Yuusuf (Keenadiid)

Wafdigii **QM** waxay albaabada u fureen qaabilaada ururadda bulshada Soomaalida, ugu horeeyn Culimada, Isimadda, Ganacsatada, Haweenka iyo intii ra'yi qadimeysa, waxay dhamaan cabireen inay ku mideysan yihiin doonista xoriyadda iyo midnimadda, taladana uga dambeeyaan ururada. Waxaa xusid gaara mudan Abwaannada Soomaaliyeed ee indheer-garadka ah oo dedejiyey biseylka iyo dareenka Ummadda Soomaaliyeed, kuna abuuray walaalnimo & wadajir muujisay jiritaankooda. Hal-abuurkii abwaanadaa saldhig u noqday qadiyadda ururadda & shacabka, kana soo taxay fidintii **diinta islaamka**, soo maray **Amiirkii Axmed Gurey**, ilaa daraawiish & **Sayid Max'ed Cabdilla Xasan**. Waxaa abuurmay dareen in ruux walba uu naf iyo maal u diyaarsho difaaca Diinta, Dalka, iyo Dadka, taasoo u diiday gumeysiga iyo dabadhilifkiisa albaab iyo daaqad looga soo dhaco **QAYBI OO XUKUN**. **Qabiilku** waa cudur bii'ada dalkeena si weyn ugu noolaan kara, in la suuxiyo mooye ciribtirkiisu weli nooma suurtagelin, qiyaas qarnigii mar ayuu sakaraad dhabarka noo dhigaa ( **Dhabar dhul la dhac** ). Xilligii gobanimodoonka abwaannadda gobolada dhexe, waqooyi iyo koonfurba, waxay cudurkaas ku kulmiyeen irbad sun ah, ayagoo dadkii ugu soo bandhigay qaab gabay, hees, buraanbur, riwaayad, oo ku wada saleysan kala garasho **Gob-nimo & Gun-nimo**, iftiiminta sawirka **Xaqqa & Mustaqbalka**. **"Soomaali gobannimo waxaw geeyey 'Leegada' e ----- Gabbaad lagu hirtaa bay noqdeen amase gaashaane Nimankii u guntaday oo xornimo goor walb u taagan --- Iyo kaan la garaneyn macnaha yaw garnaqi doona" ?**

( Cismaan Yuusuf Keenadiid )

Wa Billaahi Al-Towfiiq.